

DIS129-SO

1. Bukaanku waa inuu iska ilaaliyaa tuubooyinka sharaabka lagu dhuuqo.
2. Bukaanku waa inuu iska ilaaliyaa inuu sanku fiifsado.
3. Dhamaan dawooyinka la qoray waa in sida la faray loo siiyaa:
 - Antibiyootiga Afka laga qaato: Waxay ku xidhantahay bukaanka. Qof walba looma qoro antibiyootiga afka. Haddii adiga lagu qoray fadlan sidii lagu faray uqaado.
 - Dawooyinka Sanka Fura: Afrin (oxymetazoline nasal, mid lagu qoray ama iska soo iibsatay) 2 ilaa 3 jeer ku buufi dulkiiba mudo 3 maalmood ah.
4. Bukaanku waa inuu iska ilaaliyaa ficiladan soo socda:
 - Afuufka qalabka hawada ku shaqeeyo
 - Qiiq nuugida
 - Candhuuf tufid
 - Afkoo aad loo kala qaado
 - In laga hindhiso sanku (badalkeeda, dhiiri gali hindhisada afkoo furan)
 - Dabaasha
 - Jimicsiga (jimicsiga fudud waa caadi)
5. Dhiiri gali dareere ama cunto jilicsan.
6. Siiwad nidaamka nadaafada afka adigoo si toos ah u caawinaya.
7. Taxadar marka aad nadiifineyso agagaarka meeshii la qalay.
8. Ufiirso dhiigbaxa qalliinka kadib; ma'aha waxaan caadi ahayn in wax yar oo dhiig ah kaa yimaado sanku dhawr maalmood.

Macluumaadkan waxaa loogu talagalay ujeedo waxbarasho oo kaliya. Looguma talagalin inuu badalo talooyinka ay bixiyaan daryeelayaashaada caafimaadka. Haddii aad qabto wax su'aalo ah la hadal dhakhtarkada ama kooxdaada daryeelka caafimaadka.

Hadii aad tahay bukaan Gillette oo qaba su'aalo deg deg ah ama walaac, fadlan la xidhiidh khadka kalkaalisoooyinka 651 -229-3890